HAGAHA JEEBKA EE

# KA FURASHADA GANACSI

# SAINT PAUL

(IYO SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO)



SAINT PAUL







# KOLKA WAXAAD DOONAY-SAA IN AAD GANACSI KA FURATO SAINT PAUL?

*Waa aanu kugu bogaadinayaa taa waana aad ku mahadsan tahay doorashada magaaladayada!*

Ganacsiyada kaagoo kale ahi waxa ay kaalin weyn ka yihiin horu kaca magaalada. Magaalada Saint Paul waxa ay doonaysaa inay kugu caawiso akhbaarta aad u baahan tahay si aad hor u kac u sameyso.

Shaki kuma jiro inaad diyaar u tahay in aad hawshan ku dhawaaqdo oo aad hamigaaga ka dhabayso. Sababtaa weeye sababta buugan yar ee hagaha ee gacantu ee akhbaarta badanu ku qoran tahay aad ugu baahan tahay. U arag in uu yahay buugani khariidada wadada lagu socdaalayo loo isticmaalo si uu kaaga caawiyo laga bilaabo marxaladaha qorsheynta ilaa iyo xaflada furitaanka – xaqiiqdu waxay tahay shaxanka halkan la isku tusay waa khariido oo kale laga bilaabo marka hore iyo dhamaadka.

Aan bilowno hawsha!



## TALAABADA KOOWAAD

# HAWO ADUUN

*Inaad qasdigaaga gaarto wuxuu u baahan yahay, qorsheyn, aragti, cilmi baaris–iyo xitaa qorsheyn badan oo kale. Laakiin, waa aanu og nahay inaad hawshaa ka soo bixi karto.*

Laga bilaabo abuurida qorshe ganacsi ilaa iyo ka fakarida meesha aad rabto in aad ganacsigaaga ka furto (Saint Paul dhinaca bari ama galbeed? Baladka hoose (skyway) ama meel ka mid ah Frogtown?), waxa aanu haynaa aqoon kaa caawinaysa wada u xaarida kaana duwaysa wixii xayiraad ah ee kaa hor imaan kara.

### TALAABO QAAD

- *Sameey qorshe ganacsi*
- *La soo xiriir magaalada si aad uga hesho akhbaar ku saabsan ka furashada ganacsi Saint Paul*
- *Daris goobaha*
- *Ka diiwaan gali ganacsigaaga Xafiiska Xog hayaha Gobolka Minnesota*

*"Mar kasta waxaan ku hamiyi jiray in aan furto ganacsigan."*

### WAXA AY TAHAY IN LA OGAADO

- U Qorida hadafyada iyo talaabooyinka ganacsiga uu qaadi doono si qorshaysan waxa ka caawin amaah bixiyeyaasha ama maal geliyeyaashu in ay fahmaan fakarkaaga iyo sida uu ganacsigaagu ku guulaysan doono.
- Dhaqaalaha ka dib, hubi in aad ku darto akhbaar aasaasi ah sida khibradaada shaqada, maalmaha iyo saacadaha uu ganacsigaagu furnaan doono, qalabka loo baahan yahay (makiinada biisada lagu dubo, mashiinada koobiga, iwm).
- Hay'ada Shaqooyinka iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota waxa ay haysaa akhbaar badan oo wax caawisa oo ku saabsan sida loo qoro qorshayaasha ganacsiyada iyo dhinacyo kale oo quseeya sida ganacsi cusub loo furto.

  **W** *mn.gov/deed/business*
- Khayr wax kuma yeelee shar u toog hay baanu niraahnaa. Ka hor inta aadan saxiixin liis ama gelin wax heshiis ah oo ku saabsan goob, xaqiiji in goobtaa loo adeegsan karo nooca ganacsiga ah ee aad doonayso in aad furto. Tusaale ahaan, ma doonaysid in aad gadaal ka ogaato adigoo jaa heshiis 2 sanno ah saxiixay in aan laga furi karin goob gawaarida lagu dhaqo xaafad dad degan yahay dhexdeed.
- Kolka aad eegayso goobaha, waa ay ku caawin hadii uu wakiil kaa noqdo qof sharciyada guryaha khibrad u leh ama/iyo dulaal guryaha gada ah.
- Helidda Khidmada Bulaacada waxay u saa'idin kartaa kharash badan marshuuca. Waxaad la xiriir taa Golaha Nawaaxigeeda ciyowba si loo qiimeeyo lacagahaas taasoo ku salaysan goobta aad joogto iyo waxa loo isticmaalayo.

### QORAALADA

## SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO

- Mar mar badan horey ula soo xiriir magaalada. Shaqaalahayagu waxa ay diyaar iyo heeganba u yihiin ayna awoodaan in ay ku gacan qabtaan inta hawshu socoto si ay kaaga caawiyaan ka hor taga wixii lugooyo kugu ah ah.
- Hadii darbiyada dhismayaasha taariikhiga ah ee Saint Paul ay hadli kari lahaayeen, waxa ay kuu sheegi lahaayeen in loo aqoonsaday in ay yihiin rugaha taariikhi ah oo ah in la ilaaliyo iyo in kale. Waa ku caawin lahayd in aad ogaato, waayo meelaha caynkaa ah waxaa laga yaabaa in ah u baahdaan ansixino dheeraad ah. Nasiib wanaag waxaa ah in shaqaalaha qaabilsan Ilaalinta Taariikhigi ah ay ku faraxsan yihiin in ay ka jawaabaan wixii su'aalo ah.

  **W** *stpaul.gov/hpc*
- Ma qabtaa wax su'aal ah oo ku saabsan seerayaasha? Shaqaalaha magaalada waxay kaa caawin karaan kaliya ma aha in aad fahamto sharciyada seerayaasha ee jira ee waxay sidoo kale ay kuu sheegi karaan waxa aad kala dooran karto hadii aad doonayso in aad hesho ogolaansho gaar ah oo la yiraa duwanaan.
- Waxa aad ka ogaan kartaa saraha banaan hadii aad gasho shabakada Akhbaarta Furan ee magaalada (Opan Information). Hadii dhisme uu banaan yahay kala hadal shaqaalaha magaalada sidii aad ku heli lahayd akhbaar sartaa.

  **W** *information.stpaul.gov*

## KHAYRAADYADA KALE

*Wixii akhbaar ah ee dheeraad ah ee ku saabsan helida khayraadyada kale iyo caawimaad khibredleyaal bixiyaan oo ku saabsan sida lagu aasaaso ganacsiyada yar yar kala xiriir:* **Hay'ada Shaqooyinka iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED)**

*Tilmaamaha aasaasiga ee ku saabsan sameynta, magacyada, iyo diiwaan galinta ganacsiyada kala xiiiir:* **Xog Hayaha Gobolka Minnesota**

*Wixii taba barid ama la talin, ama gargaarid ku saabsan ganacsatada ganacsiyada yar yar leh:* **kala xiriir Xarumaha Hourmarinta Ganacsiyada Yar yar ee Minnesota (SBDCs)**

*Gargaarida iyo la socodka ganacsiyada yar yar kala xiriir hay'ada la yiraa:* **Service Corps of Retired Executives (SCORE) si ay ugu xiraan ganacsata yar yar amaah bixiyeyaasha iyo maal gelinta**

*Ku xirida Ganacsiyada yar yar amaah bixiyeyaasha iyo maal gelinta:* **kala xiriir Hay'ada U.S. ee Maamulida Ganacsiyada yar yar (SBA)**

## QORAALADA

TALAABADA LABAAD

# XIRIIRO SAMEYSO

*Sida dadku yiraahdo, ma aha uun waxa aad taqaan ee waa cida aad taqaan. Kolka fadhiga ka kac oo bilow in aad dhisto xiriir  xoogan oo aad la sameysto dad badan oo kuu gargaara. Waa aad mahadin doontaa in aad sameysay taa!*

Eeg deegaanka aad doonayso in aad ganacsiga ka sameyso. Wadooyinka ku soc -soco. La hadal dadka kale ee iyana ganacsiyada ku leh deegaanka, xubnaha Golaha deegaankaa laga soo doorto, oh, ha hilmaamin in aad dadka wareysato. La xiriirka dadka deegaanku waa talaabo muhiim ah oo ah dhanka dhisida la socodka ganacsigaaga iyo helida macaamiisha ganacsiga.

## TALAABO QAAD

- *La hadal Golaha Deegaankaa xaafadda*
- *La Hadal Xubnaha Golaha Magaalada ee deegaanka aad ganacsigaaga ka sameynayso laga soo doorto*
- *La hadal dadka deegaan degan iyo dadka ganacsatada ah ee degaanka*

*"Waxa aan u baahan doonaa kaalmo darisnimo inta aan hawshan ku jiro."*



## WAXA AY TAHAY IN LA OGAADO

- Ganacsiyada deegaanka ama dadka deegaanka degani waxa ay noqon karaan ilo laga helo akhbaar wax caawsa oo ku saabsan waxa ka jira deegaanka maalin walba.
- La xiriir Golaha Deegaanku waa jid wanaagsan oo lagu baran karo deegaanka.

## SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO

- Shabakada (website) magaalada Saint Paul waxaa ku jira khariidado iyo akhbaarta cidda lala xiriiri karo si ay kaaga caawiyaan cida Golaha Deegaanka ama Golaha Magaalada ku jirta ee laga soo doorto deegaanka ganacsigaagu ku yaal.

  **W** *stpaul.gov/maps*
- Xubnaha Golaha Magaaladu aad ayey u doonayaan in ay is bartaan cidii ganacsi doonaysa in ay ku yeelato ama maal gelin ku sameyso deegaankooda laga soo doorto.

  **W** *stpaul.gov/council*

## KHAYRAADYADA KALE

*Wixii kale ee akhbaar gudaha ah ama kala war helid ah:*

**Baraha bulshada ee deegaanka arrimihiisa looga hadlo iyo baraha kale ee bulshada**

## QORAALADA



TALAABADA SEDEXAAD

# HELIDA MAAL GELIN

*Bangiga deegaankaa ku yaal ma aha khayaraadka kaliya oo laga helo magaalada. Ururo kale ayaa jira oo diyaar u ah inay lacag kugu faraqaan!*

Kolkii aad fikrad fiican ka hesho waxa aad u baahan tahay si aad ganacsigaagu u hawl galo, waxaad eegi kartaa in aad soo aruuriso ama cid aad ka amaahto lacagta aad u baahan tahay. Waxaa jira barnaamijyo iyo khayraadyo badan oo laga yaabo in ay lacag ku amaahiyaan in ay diyaar u yihiin. Waa in uun aad ogaato meesha laga helo iyo sida cid loo waysiito kaalmadaa.

## TALAABO QAAD

- *Samee saadaalin buuxda oo ku saabsan kharashka ganacsigaaga, oo ay ku jirto lacag dheeraad ah oo loogu tala galay kharashyada siyaadada ah ee soo baxa iyo/dib u dhacyada*
- *Eeg maal gelinada laga heli karo bangiyada, ururada samafalka iyo lacagaha amaahiyaasha bulshada, mashaariicda magaalada iyo maal galinada kale*

> *"Xaggee ayaan ka heli karaa in aan ka amaahdo ama ka aruuriyo lacag si uga dhabeeyo hamigayga?"*

## WAXA AY TAHAY IN LA OGAADO

Ganacsato badan waxa ay ku taliyaan in qorshe u toog hayn ah la haysto lacala hadii waqti siyaad ah ama kharash dheeraad ahi u soo baxo ka hor inta aan la furin ganacsiga. Kharash siyaado ahi in uu soo baxo oo ka badan intii lagu tala galay waa wax qaalib ah oo inta badan dhaca.

## SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO

- Shaqaalaha magaaladu waxa ay kugu xiri karaan barnaamijyo iyo ururada magaalada ay wada shaqeeyaan ee adiga kaa caawin kara bilaabida, wadida ama balaarinta ganacsigaaga.

**W** *stpaul.gov/businessresources*
**P** 651-266-6600

## KHAYRAADYADA KALE

*Wixii akhbaar ah ee ku saabsan canshuur dhimida Dowlada Dhexe ay u fidiso cidii dayactiraysa dhisme qadiimi ah:* **Xafiiska Minnesota ee Dhowrida Goobaha Taariikhiga ah**

*Wixii barnaamijyo iyo taageer ah:* **kala xiriir Hay'ada Shaqada iyo Horumarinta ee Minnesota (DEED)**

*Wixii caawinaad dheeraad ah iyo macluumaad ku saabsan sida lacag loogu soo aruuriyo ganacsigaaga:* **Ururada Deegaanka ee Samafalka iyo Ururada ku salaysan Jaamacada**

## QORAALADA

.................................................................................................

.................................................................................................

.................................................................................................




### TALAABADA AFRAAD

# HEL ANSAXID

*Waxaa jira sababo loo sameeyo dib eegida, ruqsooyinka iyo ansixinada. Sababtuna waa in lagu sugo amaanka iyo caafimaadka guud, lagu dhowro rugaha sida gaarka ah taariikhiga u ah ee Saint Paul, iyo dabcan horu kacaaga guud. Taasi waa arrin aan kuligeen isku raaci karno inay tahay mid u qalanta in dadaal caynkaa ah la geliyo.*

Dedeg u dhamaynta codsiyadu waxa ay kaa caawin in aad deg deg diyaar u noqoto habka ansixinta codsiguna uu hagaago oo aadan wax badan oo lama filaan ah aadan la kulmin. Kolkaa, aan iska war hayno, su'aalana is waydiino, ogowna in ansixin kastaa ay aad kuugu dhaweynayso in hamigaagu rumoobo.


> *"Sidee ayaan uga dhigi karaa hawsha mid si fiican isugu duba dhacda aadna isaga ilaalin karaa lugooyada?"*

## TALAABO QAAD

Qaar ka mid ah talaabooyinka ansixinta ee soo socda waxaa laga yaabaa in ay isku mar la sameeyo. Dib u eeg khariidadii hayaanka ee qaybaha hore ee buugan ku qornayd si aad u aragto sida ansixino badan oo la xiriira shatiyada iyo ruqsooyinku ay isugu xiriirsan yihiin. Kala hadal magaalada waxa aad u baahan tahay ee xaaladaada gaarka u quseeya.

Ma aha in shati ama ruqso walba laga rabo ganacsi walba. Tusaale ahaan, hadii aad la wareegayso ganacsi aadan ku tala galsanayn in aad wax ka bedesho ganacsigaa aad la wareegayso, kolkaa uma baahnid in aad qaato shatiga ama ruqso dhismaha.

## ☐ ANSIXINTA SEEREYAALKA



**ANSIXINADA SEEREYAASHA WAXAA LA ISAGA RABAA:**

- *ruqsooyinka dhismaha*
- *shatiyada*
- *bedelida wax loo isticmaalo dhismaha*
- *bedelida cida isticmaasha guriga*
- *calaamadaha*

Dib u eegida seerayaasha iyo ansixintu waxa ay sugtaa in sidii la rabay loogu isticmaalo ruqsooyinka dhismayaasha. Hadii loo baahdo waxa aad codsan kartaa shati ka duwan kuwa kale, mid dib u seereyn ah, ama mid shuruud ku isticmaalid ah, shati aan la xeer ahayn kuwa kale iyo racfaan.

Codsiyadu waxaa laga yaabaa in ay u baahdaan naqshado (kala koreyn leh) iyo qorshe rugtu leedahay.

**WAQTIGA** *Dib u eegida seerayaasha ee mashaariicdu waxa ay qaadan karaan inta u dhaxeeysa hal maalin illaa iyo 3 usbuuc. Duwanaanta iyo isticmaalada kale ee bedelani waxa ay ku dari karaan waqti dheeraad ah. Dib u seereynta iyo u naqshadeyntu waxa ay qaataan 3 illaa 4 bilood.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*


**QORAALADA**

................................................................

................................................................

................................................................

## ☐ DIB U EEGIDA QORSHAHA RUGTA




### DIB U EEGIDA QORSHAHA RUGTA IYO ANSAXIN AYAA LOO BAAHAN YAHAY KA HOR INTA AAN RUQSOOYINKA LA BIXIN:

- *wixii mashruuc cusub ee dhismo ah*
- *wax ku darid dhisme hore u jiray*
- *baarkinada gawaarida*
- *casriyeynada waaweyn*

Dib u eegida qorshaha rugta waxaa ku jira dib u eegid xiriirsan oo shaqaalaha magaaladu ay sameeyaan si ay u darsaan seeraha, gaadiidka, xooga korontada, maareynta hogaga biyuhu roobku raacaan, dhirta iyo amaanka dababka.

Qorshaha rugta ee la soo gudbiyaa waa in uu soo diyaariyaa xirfedle shahaadi ah, waa in ay ku jiraan indho-indheyn sugan, oo muujinaya meelaha rugta ugu muhiimsan sida dhismayaasha (kala koreeynta), baarkinada, marshabiyeediyada, wadooyinka guryaha gala ee yar yar, dhirta, xayndaabyada, nalalka, hogaga biyaha roobku maraan iyo xooga korontada.


**WAQTIGA** *Qorshayaasha ruga inta badan waxaa dib u eega shaqaalaha umana baahdaan in la iska arko oo la dhageysto. U ogolw ugu yaraan qiyaastii 2 illaa 3 usbuuc inta u dhaxeysa waqtiga soo gudinta iyo waqtiga falanqeynta iyo dib u eegida. Dib eegiyada labaad ee la codsadaa waxa ay ku daro waqti kale oo dheeraad ah.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

## ☐ QORSHAHA DIB U EEGIDA DHISMAHA

### QORSHE DIB U EEGID IYO ANSIXINTA BA AH AYEY U BAAHAN YIHIIN IN AY MARAAN DHISMAYAASHA CUSUBI KA HOR INTA AAN LA SIIN RUQSADA DHISIDA:




- *dihismayaasha cusub*
- *wax ku darida dhisme horey u jiray*
- *dayactirka iyo dib u habaynada dhismayaasha*

Qorshaha Dib eegida waxaa ku jira dib u eegid ku saabsan qorshayaasha dhismaha ee la xiriira naqshada, amaanka iyo xayaatada.

Qorshayaasha dhismaha ee la soo gudbiyaa waa khasab in ay soo diyaariyeen xirfedleyaal shahaado iyo aqoona u leh hawlaha caynkaa ah ee ay ku jiraan isticmaalida hadda ee goobaha, nooca dhismaha, darsid buuxda oo ku saabsan waxa cusub ee loo isticmaali doono dhismaha iyo naqshado.


**WAQTIGA** *4 illaa 6 usbuuc mashaariicda aan ka midka ahayn mashaariicda rugaha taariikhiga ah ee sida gaarka ah loo dhowro. (Deegaanada taariikhiga ah ansixintoodu waxa ay qaadaa muddo badan waayo baahida ah in ansaxin laga helo marka hore Gudiga Dhowrida Goobaha Qadiimiga ah.)*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

## ☐ DIB U EEGIDA GUDIGA DHOWRIDA RUGAHA TAARIIKHIGA AH

### DIB U EEGID IYO ANSIXIN AY SAMEEYAAN GUDIGA DHOWRIDA RUGAHA QADIIMIGA AH AYAA LOO BAAHAN YAHAY KA HOR...




Inta aan ruqso la siin dhulka ku yaal deegaanada Taariikhiga ah ee la dhowro ama rugaha leh xaaladahan soo socda:

- *dhisid*
- *dumin*
- *hagaajin*
- *wax ka bedelid dibada*

Dib u eegida iyo Ansixinta codsiyada dhulka la dhowro ee taariikhiga ah waxaa sameyn kara shaqaalaha hay'ada HPC ama Gudiga Dhowrida dhulka Taariikhiga ah si loo sugo shaqada la qabanayo in ay ka soo baxayso habraaca Magaalada ee ka degsan dib eegida.

Waxa la iska rabo kolka codsiga la soo xareynayaa waa kala duwanaan karaan, waxaana la yaabaa in loo baahdo sawiro naqshado muujinaya heerka dhismaha.

**WAQTIGA** *2 illaa 8 usbuuc, iyadoo hadba ku xiran mashruucu inta uu le'eg yahay. La xiriir shaqaalaha Dhowrida Dhulka Taariikhiga ah ka hor inta aadan soo gudbin codsiga si loo sugo in codsigaagu uu buuxo uuna u hogaansan yahay habraacyada.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Maya*

**QORAALO**

## SHATIYADA GANACSIYADA

**SHATIYADA GANACSIYADA WAA LOO BAAHANYAH SI AY U HAWL GALAAN NOOCYO BADAN OO GANACSIYADA KA MID AH OO AY KU JIRAAN:**

- *dhul dhisida*
- *gaadiidka ganacsiga loo isticmaalo*
- *garaashyada gawaarida lagu hagaajiyo*
- *khamriga*
- *khamaarka*
- *madadaalada*




Shatiyada Ganacsiga waa loo baahan yahay si loo sugo amaanka, caafimaadka iyo nolosha bulshadeed.

Codsiyada la soo gudbinayo waxaa laga rabi karaa in lagu soo daro qorshaha ganacsiga, shaxan, dhaqaalaha, iyo akhbaar ku saabsan mulkiilaha ganacsiga.

**WAQTIGA** *Waa kala duwanaan karaa iyadoo hadba ku xiran shatiga. Shatiyada qaarkood waxa ay u baahan yihiin Ogaysiin dad weyne iyo dhageysi taasoo keeni karta in muddo ka badan 60 cisho ay qaadato in shatigaa uu soo baxo.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

..............................................................................

## RUQSOOYINKA DHISMAYAASHA

**WARQADA RUQSADA DHISMAHA WAXAA U BAAHAN:**



- *Dhisida dhulka cusub*
- *Guri dhisan wax ku darida*
- *Hagaajinta ama dib u habeynta*
- *Wixi is bedel ah ee lagu sameynayo korontada, tuubooyinka ama habka HVAC*

Ruqsooyinka kali kalida ah ee dhisida dhulka, korontada, tuubooyinka, hawada diiran iyo shaqooyinka makaanikanimada, wixii kale oo shaqo u fasaxida ah waxaa laga eegaa uun arrimaha amaanka la xiriira.

Codsiga waxa uu u baahan yahay waa kala duwanaan karaan wuxuuna u baahnaan karaa naqshad dhulka la dhisayo ah in la soo raacsho.

**WAQTIGA** *Shaqada la qabanayo inta ay le'eg tahay ayey ku xiran tahay waqtiga qorshaha dib u eegidu uu qaadanayo. Mashaariicda yar yar waxaa laga yaabaa in ay qaataan hal ama lab maalmood halka mashaariicda waaweyn laga yaabo in qaataan 4 illaa 6 usbuuc. Waqtiga ansaxinta waxa uu ku xiran yahay codsiyada fatashaada ee ay soo gubiso cidda haysata warqada ruqsada ah iyo shaqadu inta ay le'eg tahay.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

..............................................................................

## GOBOLKA IYO HAY'ADA KALE EE DOWLADU SHATIYADA IYO ANSIXINADA AY BIXIYAAN



Iyadoo ku xiran ganacsiga aad furaysaa nooca uu yahay, ayaa waxaa laga yaabaa in aad u baahato shatiyo dheeraad ah oo gobolka Minnesota ama hay'adaha kale ee dowli ah ay bixiyaan.

**QORAALO**

..............................................................................

..............................................................................

## QORAALO

..............................................................................

..............................................................................

..............................................................................

..............................................................................

..............................................................................

## RUQSOOYINKA XAQUUQ U YEELADKA JIDKA




### RUQSOOYINKA XAQUUQ U YEELADKA JIDKA WAXAA LOO BAAHDAA:

- *Marka ay jiraan wax wado xayiraya (sida buubito kursiyadeeda marshabiyeediga la dhigo)*
- *Shaqo laga qabayo jidka dadku maro*

Ruqsooyinka Xaquuq u Yeeladka Jidka waxa ay sugaan amaanka dad weynaha kolka la haajinayo meelahaa (wadooyinka, marshabiyeediga, baalayaasha, iwm).

Codsiga waxa uu u baahan yahay waa kala duwanaan karaan laakiin inta badan waxa uu u baahnaan karaa naqshad dhulka la dhisayo in la soo raacsho.

**WAQTIGA** *Ruqsooyinka la xiriira jid xayirid iyo/ama dhul qodid, ugu yaraan hal usbuuc ayaa loo baahan yahay si dib loogu eego qorshaha maareynta gaadiidka, kilaafka xargaha korontada iyo wixii kale ee loo baahdo in la tix geliyo.*

*Biibitooyinka marshabiyeediga kuraastooda la dhigaa ugu yaraan waxa ay u baahan yihiin hal usbuuc si dib loogu eego qorshahooda. Hase yeeshee, hadii khalad saxid ama wax ka bedelid qorshaha loo baahdo waqti kale oo dheeraad ah ayaa loo baahan doonaa.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

## SHAHAAADADA GELIDA DHISMAHA

### SHAHAADO GELIDA DHISMAHA CUSUB AYAA LA ISKA RABAA:



- *Ka hor inta aan la gelin guri cusub*
- *Ka hor inta aan guri horey u jiray aan loo gelin isticmaal cusub oo ka duwan kii hore*

Shahaadada Gelida Dhismaha waxaa ku jira dib u eegid lagu sameeyo dhamaan hababka amaanka si loo sugo in dhismaha la galayaa uu amaan yahay oo loo geli karo sidii loogu tala galay in loo isticmaalo.

Shahaadada Gelida Dhismaha waxaa la bixiyaa ka dib kolka dhamaan ruqsooyinka dhisida la ansaxiyo.

**WAQTIGU** *Waxa uu ku xiran yahay mashruuca wax dhisidu inta uu le'eg yahay.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Maya*

**QORAALO**

## SHAHAADADA DABKA EE LA XIRIIRTA GELIDA DHISMAHA

### SHAHAADADA DABKA EE LA XIRIIRTA GELIDA DHISMAHA (C OF O) WAXAA LOOGU BAAHDAA:



- *Sii wadida isticmaalka goobta cidii rabtaa hal lahaato goobtee ka dib kolka Shahaadada Gelida Dhismaha la bixiyo*

Shahaadada Dabka ee (Cof Os) la yiraa waxa ay sugtaa in dhismayaashu loo dayactiray sida ansaxintii hore ee Shahaadada Gelida Dhismahu ay qabtay ee ahayd sidii loogu tala galay isticmaalkooda.

Shahaadada Dabka ee Gelida Dhsimayaasha waxaa la cosboonaysiiyaa kolka dhismahu u ku baaso fatashadaada lagu sameeyo.

**WAQTIGA** *Inta goor ee fatashaada cusboonaysiinta ah la sameynayo waxa ay ku salaysan tahay nooca loo isticmaalo dhismaha caadiyana waa 2 dii ilaa 3 dii sannadba hal mar.*

**LACAGTA KHIDMADA** *Haa*

**QORAALO**

## WAXA AY TAHAY IN LA OGAADO

Tirada inta goor ee dib u eegida la sameynayo iyo ansixinta magaaladu u baahan tahay waa kala duwanaan karaan iyadoo mar walba ku xiran nooca uu yahay ganacsiga aad doonayso in aad furto.

- Horey u sii qorshee ansixinta hadii dhismahaagu uu u baahan yahay calaamad dibada ah in loo yeelo, maadaama ay taasi u baahan tahay dib u eegid kale oo ka baxsan kuwa kale, waxaa kaloo laga yaabaa in loo




  baahdo shuruudo kale oo dheeraad ah oo la xiriira dhowrida dhulka taariikhiga ah ama qorshe ku saabsan calaamadaha waaweyn. Waxaad u baahan tahay in aad qabsato qandaraasle calaamadaha sameyntooda shati u haysta.
- Soo gudbinta dukumiintiyada dhameysta tiran kana soo baxa shuruudaha habraaca ansixin walba waxa ay keenaan in waqtigii lagu rabay dib loogu eego codsigaaguna uusan dib u dhicin.
- Sharciga Dadka naafadaha quseeya ee la yiraa [American with Disability Act (ADA)] iyo sharciyada gobolka waxa ay faraan ganacsiyadu inay sameeyaan qaab dadka naafadaha ahi ay ku soo gali karaan ganacsiyada.
- Ka hel gargaar dadka khibrada u leh arrimhaa si ay mashruuca u caawiyaan, sida qandaraasleyaal shahaadi ah, ingineerada dhismaha, iyo la taliyeyaal tala kaa siiya dhanka deegaanka iyo sabada.
- Qaar ka mid ah noocyada shatiyada, dib u eegida dhowrida dhulka qadiimiga ah ama wax ka bedelida seerayaashu waxaa laga yaabaa in ay u baahan yihiin is arag dad weyne si looga wada hadlo.
- Hadii aad makhaayad furanayso leh kuraas dibada la dhigo, waxa aad u baahan tahay shati iyo ruqso gooni ah oo la xiriirta kuraasta dibada la dhigayo.
- Khidmadaha Bulaacadahu (SAC) waxa ay ku dari kharash weyn oo marka horeba la iska rabo mashruuca. Horey ula sii xiriir Hay'ada la yiraa Golaha Nawaaxigeeda si aad uga hesho qiyaas ku saabsan khidmadaha ku salaysan goobta iyo isticmaalka.




- Hadii lagu yiraaho ma aad sameyn kartid waxa aad doonayso in aad sameyso, waydii in ay jiraan wax kale oo aad la yeeli oo la heli karo. Waxaa laga yaabaa in aad racfaan qaadato, fulin kale aad raadiso, ama aad u soo hesho ganacsigaaga ra'yi kale oo ka fiican kii hore.
- Tusaalayaasha arrimaha ka dhigi kara mashruuca wax dhib badan:
  - Dhisid weyn oo lagu sameeynayo dibada iyo gudaha;
  - Bedelida wixii loo horey loogu isticmaali jiray dhismaha ama balaarinta xarunta;
  - Dayactirka rugaha ama xaafadaha qadiimaha ah ee la dhowro.

## SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO

- Shaqaalaha magaalada Saint Paul waxa ay ka jawaabi dhamaan wixii su'aal ah ee la xiriira seerayaasha magaalada, ruqsooyinka, qorshayaasha rugaha, iyo fatashaadyada, waxaan kaloo kugu xiri karnaa Mashruuc isku duwe noqda qofka kaliya ee aad la xiriir karto si uu kaaga caawiyo hawlaha la xiriira shatiyada iyo ruqsooyinka.

  **W** *stpaul.gov/dsi*
  **P** 651-266-8989

- Shaqaalaha Dhowrida dhulka Taariikhiga ah waxa ay kaa caawin karaan in aad fahamto aadna dhex maaxdo nidaamyada iyo sharciyada arrintaa quseeya hadii ganacsigaagu uu ku ooli doono rug ama xaafad ka mid dhulka Taariikhiga ah ee la Dhowro.

  **W** *stpaul.gov/hpc*

## KHAYRAADYADA KALE

*Wixii kale ee macluumaad ah ee ku saabsan shatiyada gobolka, sharciyada dowlada dhexe, ruqsooyinka la xiriira deegaanka waa:* **Hay'ada Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED)**

*Shatiyada Ganacsiyada iyo Ruqsooyinka Wixii la xiriira Ogaanta Bulaacaha la heli karo khidmadooda (SAC) ama la xiriira ganacsiyada cusub, bedelida goobta, ama bedelida waxa loo isticmaalo goobta kala xiriir:* **Metropolitan Council**




### TALAABADA SHANAAD

# FURIDA GANACSIGA

*Marka ugu horeeysa, hambalyo iyo bogaadin. Waadna ku mahadsan tahay shaqo ka abuurida Saint Paul.*

Waa aad hamiday. Waa aad qorshaysay. Waadna soo heshay maal gelintii iyo dhamaan wixii ansixin ahaa ee loo baahnaa. Hada aad baad ugu dhowdahay in aad furto ganacsigaaga, waxaad moodaa inaad maqlayso gambaleeleyaasha yar ee ka koreeya albaabka oo dhacaya. Hadda waa waqtigii aad ka fakari lahayd qorashada shaqaale cusub iyo wax kaleba. Ka hor inta aadan cid kale keenin, hubi in aad wax ka ogaato sharciyada qaabilsan shaqaalaha iyo canshuurta ee dowlada gobolka, tan hoose iyo tan dhexe. Kolka aad sii dhex gasho jidadka aad ku balaarin karto ganacsigaaga, mar kastaba xasuusnow in magaaladu ay kuu fidinayso caawimaadyo badan oo kala duwan, ayna kuu hayso khayraad iyo fursado ay qandaraas kugu siin karto.

## TALAABO QAAD

- *Qoro shaqaale*
- *Eeg fursado aad ku balaarin karto ganacsigaaga adigoo qandaraasyo ka raadinayo Magaalada Saint Paul*
- *Xasuusnow maalmaha Muhiimka ah (sida, waqtiga canshuur xareynta, shatiyada la cusboonaysiiyo iwm)*

*"Hamigaygii in uu dhaboobo aad baan ugu dhawahay. Maxaa ii haray in aan sameeyo kolka aan ganacsigayga furo siina balaariyo."*

## WAXA AY TAHAY IN LA OGAADO

- Hay'ada Shaqada iyo Horumarinta Shaqaalaha ee Minnesota waxa ay bixisaa Liis caawiya sida loo qorto shaqaalaha liiskaasi waxa uu kaa caawin karaa habka qorashada shaqaalaha.
- Waydii shaqaalaha magaalada si aad u hubiso in aad la socoto dhamaan xeerarka loogu tala galay in lagu sugo in shaqaalaha si xaq ah loola dhaqmay, ay helaan agabka ay xaqa u leeyihiin goobtooda shaqaduna ay amaan tahay.

## SIDA MAGAALADU WAX U CAAWIN KARTO

- Barnaamijka Shahaada siinta Dhexe (CERT) waxa uu ka caawiyaa in uu ku xiro ganacsiyada yar yar, ganacsiyada dadka laga tira badan yahay ama haweenku leeyihiin tababarada iyo fursadaha ganacsi ee magaalada Saint Paul ay bixiso. La xiriir magaalada Waaxdeeda Xaquuqda Aadanaha iyo Fursadaha Dhaqaale si aad u hesho akhbaar Dheeraad ah.

  **W** *stpaul.gov/hreeo*

- Shaqaalaha magaaladu waxa ay kugu xiri karaan mashaariicda deegaanka, ururo ay magaalada wada shaqeeyaan, mashaariico gobolku, nawaaxigu ama dowlada dhexe leedahay kuwaa oo laga yaabo in ay kaa caawiyaan bilaabida, joogteynta ama balaarinta ganacsigaaga. Shaqaalahu waxay kaloo ku siin karaan macluumaad ku saabsan ururo gargaarka ku bixiya afaf badan oo kala duwan.

  **W** *stpaul.gov/businessresources*
  **P** 651-266-6600

## KHAYRAADYADA KALE

*Wixii macluumaad ah ee ku saabsan amaanka shaqada iyo saxada, lacagta lagu shaqeeyo, xuquuqda shaqaalaha dhaawacma kala xiriir:* **Hay'ada Minnesota ee Shaqaalaha iyo Shaqada (Minnesota Department of Labor and Industry)**

*Wixii faahfaahin dheeraad ah ee ah khayraadka, iyo caawimaada khibradleha oo ku saabsan sida ganacsi loo bilaabo kala xiriir:* **Hay'ada Minnesota ee Shaqada iyo Hor u marinta Dhaqaalaha (DEED)**

*Wixii khayraad iyo macluumaad ah oo la xiriira kobcinta ganacsigaaga, qandaraasyada dowlada laga helo, iyo adeegyo badan oo duwanba kala xiriir:* **Bixiyeyaasha Gargaarada Farsamo ee Beesha**

*Wixii Mashaariic, khayraad, kulanada war is waydaarsiga ah iyo taakuleynta mulkiileyaasha ganacsigayada kala xiriir:* **Ururka Deegaanka ee Ganacsiyada**

## LA XIRIIR KHIBRADLE

SAINT PAUL

### WAXAAN HALKAN HEEGAN UGU NAHAY IN AAN KU CAAWINO!

*Su'aalo guud? Aan hubin meesha wax laga bilaabo? Nala soo xiriir anaga:*

**P** 651-266-6600
**E** businessresources@ci.stpaul.mn.us

### MOWDUUCYADA GAARKA AH:

*Ruqsooyinka dhismayaasha, seerayaasha iyo fatashaada, intooda badan shatiyada ganacsiyada, dib u eegida rugaha iyo qorshayaasha dhismayaasga:*

**Waaxda Amaanka iyo Fatashaadaha**

**P** 651-266-8989
**E** DSI-InformationAndComplaints@ci.stpaul.mn.us
**W** stpaul.gov/dsi

*Mashaariicda guud ee gargaar iyo dhaqaale u fidinta ganacsiyada:*

**Waaxda Qorsheynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha.**

**P** 651-266-6600
**E** businessresources@ci.stpaul.mn.us
**W** stpaul.gov/businessresources

*Deegaanada deegaanka ku yaal ee loo magacaabay in ay yihiin dhismayaal ama xaafado taariikhi ah.*

**Dhowrida Deegaanka Taariikhiga ah (Heritage Preservation)**

**P** 651-266-9078
**W** stpaul.gov/hpc

*Fulinta qandaraasyada magaalada, beeca, Barnaamijka CERT ee lagu gargaaro ganacsiyada yar yar iyo kuwa dadka laga badan yahay iyo haweenku leeyihiin.*

**Waaxda Xuquuqda Aadanaha iyo Si Siman u siinta Fursadaha Dhaqaale cid walba**

**P** 651-266-8900
**W** stpaul.gov/hreeo

*Macluumaadka lagu soo ban dhigay buugan hogaanka ah waxaa loo siiyey akhriyaha hawl fududeyn uun. In kastoo aad loogu dadaalay in la sugo in dhamaan macluumaadka halkan lagu soo bandhigay ay sugnayd kolkii la daabacay, hadana Magaalada Saint Paul ma bixin karto hubaal ah in macluumaadka halkan lagu soo bandhigay ay dhamaanteed sugan tahay. Ma aha ujeedadda Magaalada Saint Paul in ay cid siiso talooyin dhanka sharciga ah, waxaana lagugu dhiiri galinayaa inaad kala tashato qareen aad adigu doortay wixii sharciyan la iska rabo ee looga hadlay buugan. Si kastaba ha noqotee, Magaalada Saint Paul laguma qaameyn karo wixii fal ah ee la qaaday ama laga tagay iyadoo la tix raacayo wax macluumaadka ah ee halkan ku jirta sidoo kale ma aha in lagu qaameeyo magaalada Saint Paul wixii kale ee cawaaqib ee ka yimaada tix raaca akhbaarta buugan.*

*©2017. Magaalada Saint Paul. Xuquuqdeeda akhbaarta*